



Agaasimaha Isboortiga Wells Oo La Siiyay Maamuus Sarre

Markii Mike Nolan ee Dugsiga Sare ee Ida B. Wells loo magacaabay Agaasimaha Isboortiga Sannadka ee Ururka Agaasimayaasha Isboortiga ee Oregon (OADA), ma jirin qof ka farxad badan saaxiibadiis wada shaqaynta.

"Mike wuxuu sii wadaa inuu ka shaqeeyo horumarinta dhammaan dhinacyada waaxdeena isboortiga," ayuu yiri Jeremy Shetler, madaxa Wells ee kubbadda koleyga. "Ku lug lahaanshihiisa wuxuu dhaafsiisan yahay darbiyada iyo garoonada iskuulkeena. Wuxuu ku dadaalaa inuu la xiriiro bulshada guud ahaan, oo ay ku jiraan ururada kale ee dhalinyarada ee isboortiga iyo qalinjabiyaasha Wells, waana lagu amaanaa."

Leann Van Horn, oo ah kaaliyaha isboortiga ee Wells, ayaa taas ku raacday. "Waxa dadka intiisa badan aysan garaneynin waa waqtiga ugu badan ee Mike uu geliyo si loo hubiyo in ardaydeena-ciyaartooyda ay leeyihiin waayo-aragnimada ugu wanaagsan ee suurtoogalka ah iyada oo loo marayo barnaamijyo kor u qaadaya isku-dhafka iyo madadaalada."

Nolan waxa uu helay abaalmarinta 17-kii Abriil iyada oo qayb ka ah shir sannadeedka OADA. Isagoo markii ugu horeysay ku biiray Dugsiyada Dadweynaha Portland macalin taariikhi ah iyo tababaraha kubbadda koleyga iyo baseball-ka ee Benson 1999, wuxuu u guuray wixii markaas ahaa Dugsiga Sare ee Wilson laba sano kadib. Markii hore waxa uu noqday macalin cilmiga bulshada iyo tababaraha kubada kolayga ee gabdhaha. Kadib, sanadka 2017, waxaa loo magacaabay agaasimaha isboortiga ee Wells wuxuuna ka dhigay hawshiisa ilaa iyo hadda inuu ubadka hormariyo iyo ku hogaamiyo naxariis iyo daryeel.

Waxa kale oo uu jecel yahay in uu si toos ah ula shaqeeyo shaqaalihiiisa tababarka, kuwaas oo uu ku tilmaamay khabiirada dhabta ah. "Waxaan uga soo jeedaa dhinaca wada shaqaynta," Nolan ayaa yiri. "Waxaan halkan u imid inaan taageero oo aan bixiyo hagitaan iyo latalin marka loo baahdo."

Nolan shakhsi ahaan wuu ogyahay saamaynta togan ee isboortiga ku yeelan karaan dhalinyarada ka qaybqaadata. Wuxuu u dhashay Monroe, Oregon, wuxuu mudnaan u lahaa inuu ka ciyaaro kooxaha kubbadda koleyga iyo baseball-ka ee magaaladiisa. Guushu waxay ahayd mid cajiib ah, ayuu yiri, laakiin waxaa ka sii muhiimsanayd xiriirkii nololaha oo uu la sameeyay asxaabtiisa iyo casharradii uu ka bartay, garoonka dhexdiisa iyo bannaankiisaba.

"Guusha waxay ahayd yool laakiin ma ahayn ujeedadeena," ayuu yiri. "Waxaan wada qaadanay madadaalo badan, waxayna ii ahayd waayo-aragnimo weyn sababtoo ah waxay i siisay aasaas adag shaqada aan hadda qabto. Anigoo fursad u helay inaan ciyaaro isboortiga ee dugsiga sare, waan ogahay waxa aan u baahanahay inaan sameeyo si aan ardayda-ciyaartoyda uga dhigo inay dareemaan taageerada iyo guusha."

Nolan waxa uu ku qiimeeyaa nidaamkiisa taageerada gaarka ah - qoyskiisa - oo ka caawiyay inuu ku guuleysto shaqadiisa. Labadiisa gabdhood ugu waaweyn waxay ka qalin jabiyeen PPS, canugiisa ugu yarina waa arday ku jira fasalka sideedaad ee Robert Gray. Nolan wuxuu si gaar ah ugu mahadcelinayaa xaaskiisa, Chrissy, oo naf-hurnimadeeda ay suurtagelisay shaqadiisa.

"Iyada aad ayay u wanaagsan tahay, gaar ahaan wakhti kasta oo aan ka maqanahay guriga," ayuu yiri.

Isboortigu wuxuu baraya ciyaartoyda da'da yar waxyaabo badan - adkeysii, sida loo guuleysto si is-hoosaysiin ah, sida loo guul-darraysto si xarrago leh, sida kooxdaada looga hormariyo naftaada. Waa xigmadda ugu dambaysa ee inta badan ogeysiisa Nolan shaqadiisa agaasime isboortiga.

"Uma arko abaalmarintan mid shakhsi ahaaneed," ayuu yiri. "Waxaan tan la wadaagayaa asxaabteyda tababarayaasha ah ee shaqada weyn ka haya bulshada iyaga oo ku beeraya qiyam xooggan ardaydeena-ciyaartoyda oo ka soo saara waxa ugu wanaagsan iyaga. Waxaan dareemayaa nasiib inaan qayb ka noqdo. Waa mudnaan run ah."